



### Iskoollada maxay u tixgelinayaan School-SPIRIT?

Waxuu horumariyaa xirfada hormuud ee ardayda ayadoo awood u siineysa inay caddeeyaan waxna ka qabtaan iskudhaca iskoolladooda

Waxay ka shaqaysaa iskaashiga u dhaxeeya ardayda iyo xubnaha kale ee bulshada iskoolka

Waxay isku keenta kooxo arday ee kala duwan si ay u helaan waxay isku midka ka yihiin iyo inay is kushmeeyaan

Waxay kor u qaadaa xirfada arday ee xalinta dhibaataada ayagoo isticmaalayo nidaamk shanta-tallaabo si ay u caddeeyaan arrimaha una xaliyaan

Waxay kordhisaa tayada iskoollada si wax looga qabto iskudhaca ayadoo abuuraysa gole ardayda hormuudkeeda si ay ula shaqeeyaan shaqaalaha iskoolka si leys kula hirgeliyo xal

Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeegga Xiriirka Bulshada

## Awood siinta Ardayda

Si leys kaga kaashado in la caddeeyo wax ka qabashada iskudhaca

Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeegga Xiriirka Bulshada (CRS) waxay ka caawisaa ardayday inay wax ka qabato iskudhaca iskoolka ayadoo la isticmaalayo Barnamijka Ogaashada Dhibaataada iyo Isla Xalinteeda ee Iskoolka, loo soo gaabiyo (School-SPIRIT.) barnamijka waxuu ardayda ka caawiyaa inay wax ka qabato xiisada iyo iskudhaca la xiriira arrimaha jinsiyada, midabka, asalka wadanka, jinsiga, jinsgina qofka isku tiriyo, Nooca Galmada ay doorbidaan, diinta, iyo naafanimada.

CRS iyo fududeeyayaasha tababaran ee tabarruca ku shaqeeya ayaa barnamijka School-SPIRIT dadka gaarsiiya maalin buuxda ama labo nus maalin ah, kaasoo isku keena kooxo kala duwan oo arday ah si loo caddeeyo waxna looga qabto arrimaha. Barnamijka waxaa wado ardayda waxuuna ka caawiyaa inay yeeshaan xirfad lagu xaliyo dhibaataada, ay kamid tahay cadeynta arrinta iyo kala hormarinta sida ay muhiimada u leeyihiin, go'aan gaarida, iyo horumarinta xalka. Natijada ayaa ah in ardayda ay ka qaataan dowl hormuud si wax uga qabtaan iskudhaca iskoolkooda ayna u dhisaan xirfada iyo tayada looga hortago iskudhaca mustaqbalka.

### Dulmarka Guud ee Barnamijka ▼



#### 1. Caddeeynta Arrinta

Ardayda waxay iskula shaqeeyaan kooxo yaryar si u caddeeyaan arrimaha saameynaya iskoolkooda, ay kamid tahay waxa shaqeeya iyo waxa in la badelo ah. Kooxahan yaryar kadib waxay warbixin ka siiyaan kooxda weyn.

#### 2. Kala Horumarinta Arrimaha

Arrimaha lagu caddeeyay kooxaha yaryar, ardayda waxay kala horumariyaan arrimahan sida ay muhiimada u leeyihiin si wax looga qabto iskoolkooda.

#### 3. Horumarinta Xalka

Ardayda waxaa loo diraa kooxo yar oo cusub si loo horumariyo xalka arrimaha la caddeeyay ee muhiimada leh. Waxay ka hadlaan saameynta iyo cawaaqibta ka imaan karta xalka waxayna warbixin u diraan kooxda weyn.

#### 4. Golaha SPIRIT

Ka qeybgalayaasha ardayda waxay xubno u doortaan Golaha SPIRIT. Golaha waa koox ka kooban hormuudka ardayda oo la shaqeeya shaqaalaha iskoolka si loo hirgeliyo xalka la sameeyay xiliga barnamijka School-SPIRIT.

#### 5. Warbixinta & Wadahadalka SPIRIT

CRS waxay isku aruurisaa ifto bixinta iyo macluumaadka laga soo aruuriyay barnamijka School-SPIRIT si warbixin loo diyaariyo. CRS waxay wadahadal u qabataa Golaha SPIRIT iyo hormuudka Iskoolka si dib loogu fiiriyo warbixinta iyo loo horumariyo loona hirgeliyo tillaaboyin cadcad ee la qaadi karo si wax looga qabto waxyaabaha keenaya iskudhaca looga hadlay kulamadaan.

### Waa Ayo CRS ▼

Waxaa lagu aasaasay sharciga Xuquuqda Shacabka 1964kii (Title X), waxaana lagu sii ballaariyay sharciga Kahortagga Dambyada Naceybka Mathew Shepard iyo James Byrd, Jr., ee 2009kii. CRS waa “Nabadoonka Mareykanka” u ah bulshada soo wajahday xiisado ama isku-dhac ku saleysan kala duwanaanta midabka, asalka, sinjiga, sinjiga uu sheegto, diinta, iyo naafonimada. Ujeedka adeegyada CRS waa inay kor uqaado awooda bulshada ay si gooni ah iyo wadajir ah uga hortagaan una xaliyaan iskudhac mustaqbalka ayadoo la isticmaalayo sida xalinta dhibaataada, aqoon kordhin, iyo ka shaqeynta xiriirka.

### Adeeyada iyo Barnaamijada CRS ▼

CRS waxay siisaa bulshooyinka la kulmo xiisad, barnaamijyo gogoldhig u ah fahanka, hagaajinta wadashaqeynta, iyo kahortagga iska hor imaad mustaqbalka. Shaqaalaha CRS waa xirfadlayaal dhexdhexaadiyaal, tababarayaal, iyo la taliyayaal khibrad u leh isku keenka xubnaha bulshada si ay u hagaajiyaan awoodooda xalinta iskudhac jiro iyo ka hortagaan iskudhac mustaqbalka ah.

### Xagee ka Shaqeynaa ▼

**Xarunta CRS** 📍  
Washington, DC

**Xafiisyada Gobolada CRS** 📍

**New England**  
Boston, MA

**Galbeedka-dhexe**  
Chicago, IL

**Galbeedka**  
Los Angeles, CA

**Waqooyi-bari**  
New York, NY

**Konfur-galbeed**  
Dallas, TX

**Waqooyi-galbeed**  
Seattle, WA

**Atlantiga-Dhexe**  
Philadelphia, PA


**Dhexda**  
Kansas City, MO

**Xafiisyada CRS ee Goobaha Shaqada** 📍

**Konfur-bari**  
Atlanta, GA

**Buuraleyda**  
Denver, CO

Miami, FL    Houston, TX  
Detroit, MI    San Francisco, CA



### Naga hel, nagala xiriir ▼

[www.justice.gov/crs](http://www.justice.gov/crs)

 [facebook.com/DOJCRS/](https://www.facebook.com/DOJCRS/)

 [@DOJ\\_CRIS](https://twitter.com/DOJ_CRIS)

 [askcrs@usdoj.gov](mailto:askcrs@usdoj.gov)

 202.305.2935

Wixii macluumaad barnaamijkan ee dheeri ah ama adeegyada kale ee CRS, fadlan la xiriir xafiiska CRS ee magaaladaada.  
<https://www.justice.gov/crs/about-crs/regional-and-field-offices>